DHS-3247-SOM 6-19



# Tusaha Qoyska ee Ilaalinta Cunuga

Habraacani waxa uu caawin fahmida waxa shaqaalaha hay'ada adeegyada bulshadu ay sameeyaan marka warbixin cunug dar-xumeyn ah la aqbalo.

Habraacan waxaa loogu tala galay:

- Waalidiinta
- Dambi lagu tuhayaasha
- Iyo cidii kale ee bixisa akhbaar ku saabsan cunug la dar-xumeeyey.

Marka shaqaalaha adeegyada bulshada ay soo gaarto warbixin, waxa ay go'aansadaan inay waafaqsan tahay warbixinataasi waxa sharcigu u qeexo cunug dar-xumeyn. Qaarka mid ah warbixinadu waxa ay ku saabsan yihiin walaacyo aysan ku jirin cunug silcin. Kolka taasi dhacdo qoyska waxaa dhici karta in loo fidiyo adeegyada daryeel ilmaha oo akhiyaar ah.

Marka warbixini ay ka soo baxda sharuudaha waxa sharcigu uu yiraa waa cunug silcin, shaqaalaha hay'ada adeegyada bulshada waa khasab inay sameeyaan Qiimeyn Qoys ama Baaritaan Qoys. Shaqaalahu waxa ay u baahan yihiin inay hubiyaan in cunugu uu amaan yahay ka dibna waxa ay go'aansadaan waxa ay sameynayaan iyadoo mar walba ku xiran sida warbixintu ay khatar u tahay. Shaqaalahu waxay kaloo u baahan yihiin inay ogaadaan in qoysku uu diyaar u yahay wada-jir u wada shaqeynta ku saabsan sidii qoysku amaan u noqdon lahaa. Talaabooyinka loo qaado labada arrimood ee waxqabad oo kala duwan– Qiimeyn Qoys ama Baaritaan Qoys – waxaa lagu sharxay habraacan.

## Qiimeynaha Qoyska

Qiimeynta Qoyska waxaa la sameeyaa marka hay'ada adeegyada bulshadu ay aqbasho warbixin ku saabsan badbaado ilmo, laakiin warbixintu aysan ku saabsanayn fara-xumeyn, khatar gelin weyn ilmood ama khatar weyn oo ah amaanka ilmaha. Shaqaalahu waxay ula kulmaan qoyska si ay qiimeeyaan baahidooda. Shaqaalaha hay'ada adeegyada bulshadu waxa ay kala shaqeeyaan qoysaska si wax looga qabto walaaca la soo sheegay loona sugo amaanka ilmaha, laakiin ma soo ogaadaan in cunug silcini dhacday iyo in kale.

Sedex talaabo ayaa la qaadi oo qayb ka ah Qiimeynta Qoyska:

### 1. Go'aaminta in cunugu amaan yahay, iyo qoysku u baahan yahay caawin si ay amaanka cunuga u sugaan mustaqbalka

Shaqaalaha hay'ada Adeegyada Bulshadu waxa ay la kulmaan waalidka iyo cunuga si ay u go'aansadaan in cunugu amaan yahay iyo in kale. Shaqaalahu sidoo kale waxa ay doonayaan inay fahmaan in qoysku u baahan yahay caawimaad iyo in kale. Shaqaalaha hay'ada Adeegyada Bulshadu waa khasab inay arkaan ayna wareystaan cunuga.

### Shaqaalaha Adeegyadu Bulshadu waa khasab:

- In ay u sheegaan waalidiinta waxa warbixintu tahay
- In aysan sheegin cida warbixinta soo gudbisay
- In ay la kulmaan cunuga waalidka iyo xubaha qoyska
- In ay la socod-siiyaan nabad-sugida warbixinta, taa oo keeni karta baaritaan wada-jir ah loo sameeyo.

Shaqaalaha Adeegada Bulshadu waxaa dhici karta inay wareystaan dad kale oo laga yaabo inay wax ka og yihiin arrinta ah walaaca la soo sheegay ama amaanka cunuga.

### Shaqaalaha Adeegyada Bulshadu waxa ay la wadaagi:

- Sababta akhbaarta loogu baahday
- Sida akhbaarta loo isticmaali

- Waxa ay yihiin xaquuqda waalidku hadii ay ka gaabsadaan inay ka jawaabaan su'aalo
- Waxa ay yihiin xaquuqda ee ku saabsan akhbaarta la soo aruuriyey
- Waxa ay yihiin xaquuqda dadka kale ay u leeyihiin inay helaan isla akhbaartaa.

### Shaqaalaha Adeegyada Bulshadu waxa ay soo aruurin akhbaar ku saabsan:

- Walaaca la soo sheegay iyo amaanka cunuga
- Waxbixinada darxumada cunuga horey loogu geystay.
- Dagaalka Qoyska iyo Isticmaalka maandooriyaha
- Xaaladaha kale ee khatarta ku ah amaanka cunuga
- Baahida qoyska iyo wixii wanaag ah oo jira

Shaqaalaha Adeegyada Bulshada waxay codsan karaan akhbaar ku saabsan cuniga, sida tan caafimadka iyo iskuulada.

Qiimeynta Qoyska waa in lagu soo gaba-gabeeyaa 45 cisho gudhood laga bilaabo waqtiga la aqbalo waxbixinta dar-xumada cuniga.

### 2. U sheegida natiijooyinka dadka kale

Shaqaalaha Adeegyada Bulshadu waxa ay u diraan warqad waalidka ama weliga cunuga marka Qiimeynta Qoyska ay gaba-gabowdo taa oo u sheegaysa iyaga:

- In qoysku uu u baahan yahay adeegyo iyo in kale
- In akhbaarta diiwaanadu ay yihiin xoggo xafidan
- Inta adeegyada bulshadu ay hayn diiwaanada.

Shaqaalaha Adeegyada Bulshadu waxaa kale oo uu u diraa warqad cidii sharcigu uu farayo inay soo sheegaan dar-xummada ilmaha, taa oo u sheegaysa:

- In Qiimeyn Qoys la sameeyey si wax looga qabto warbixintoodii
- Iyo in qoysku adeegyo heli doono iyo in kale.

### 3. Fidinta adeegyada

Xilliga Qiimeynta Qoyska, shaqaalaha waxa ay go'aansadaan in adeegyo loo baahan yahay iyo in kale si loo sugo amaanka qoyska. Adeeyada waxaa la bixiyaa hadii loo baahan yahay. Hadii Adeegyada Bulshada iyo qoysku ay isku raacaan waxaa dhici karta in adeegyo kale la bixiyo si ay u caawiyaan ka soo bixida baahida qoyska.

## Baaritaanka Qoyska

Baaritaan qoyska waxaa in la sameeyaa marka la aqbalo warbixin ku saabsan xad-gudub galmo khatar gelin weyn ilmood ama khatar weyn oo ah amaanka cunuga. Baaritaan qoys waxaa dhici karta in loo sameeyo sababo ikhiyaar ah oo ay go'aansato hay'ada adeegyada bulshadu. Labo go'aan ayaa lagu gaaraa Baaritaanka Qoyska:

- Ma dhacday dar-xumeyn cunug?
- Ma loo baahan yahay adeegyada ilaalinta ah si cunugu u noqdo mid ahaan ah mustaqbalka?

Sedex talaabo ayaa la qaadaa oo qayb ah Baarida Qoyska:

### 1. Aruurin Akhbaar si aad u ogaato in cunug la dar-xumeeyey iyo in adeegyo loo baahan yahay

Shaqaalaha adeegyada bulshadu waxa ay la shaqeeyaan hay'adaha nabad-sugida si ay u ogaadaan in:

- Cunug la dar-xumeeyey
- Waxyeeladu inay keentay wax u sameeyey eedaysanaha dambiga lagu tuhmay, ama uu sameyn waayey
- Adeegyada ilaalinta cunuga loo baahan yahay.

Shaqaalaha adeegyada bulshadu iyo nabad-sugidu waxa ay wareystaan cunuga iyo walaalihii. Wareysiga waxaa dhici karta inuu ka dhaco iskuulka ama meel kale.

Labada mid walba ha noqotee hadii ilmahu ay khatar markaa ku sugan yihiin, waxaa dhici karta in la kaxeeyo si amaankooda loo sugo. Ilmaha waxaa la geyn goob amaan ah inta laga go'aansanayo inay amaan tahay inay gurigooda ku soo noqdaan. Hadii cunug uu u baahanyahay in meel kale la geeyo shaqaalaha adeegyada bulshadu waxay ay waydiin waalidka inuu siiyo magacyada dad qaraabo ah ama casabo ah oo sii hayn kara ilmaha.

### Shaqaalaha Adeegyada Bulshadu waa khasab:

- In aysan sheegin cidda warbixinta soo gudbisay
- In ay cunuga waj-waji ula kulmaan
- In ay wareystaan eedaysanaha dambiga dar-xumada ah lagu tuhmay si ay ugu sheegto waxa warbixintu ku saabsan tahay.
- In ay wareystaan, waalidka, walaalaha, iyo ciddii kale ee cunuga haysa.

Shaqaalaha adeegtaya bulshadu waa khasab inay ay cajalad maqal ah ka duubaan dhamaan wareysiyada oo dhan hadii ay suurta-gal tahay. Hadii warbixini ay ku saabsan tahay xad-gudub galmo, wareysiga dhibanaha la soo sheegay iyo wixii kale ee ilmo ah ee makhraatiyaal ah waa in cajalad fiidyow ah laga duubaa hadii ay suurta-gal tahay.

### Shaqaalaha Adeegyada Bulshadu waxay kaloo wareysan doonaan:

- Caruuurta kale ee la nool, ama la noolaan jirtay dambi geystaha la tuhunsan yahay
- Xirfedleyaasha caafimaad
- Cidii kale ee ay dhici karto inay wax ka og yihiin dar-xummada la soo sheegay.

### Shaqaalaha adeegyada bulshadu waxa ay u sheegi waalidka:

- Sababta akhbaarta loogu baahday
- Sida akhbaarta loo isticmaali

- Waxa ay yihiin xaquuqda waalidku hadii ay ka gaabsadaan inay ka jawaabaan su'aalo
- Waxa dhici hadii waalidku ka jawaabi waayo su'aalaha
- Xaquuqdee ayuu waalidku u leeyahay akhbaarta la soo aruuriyey
- Xaquuqdee ayey waalidku u leeyahay inuusan ku raacin waxa ku qoran diiwaanada
- Xaquuqdee ayey dadka kale u leeyihiin araga akhbaarta.

## Shaqaalaha Adeegyada Bulshadu waxa ay soo aruurin akhbaar ku saabsan:

- Waxbixinada darxumada cunuga horey loogu geystay
- Da'da, jinsiyada iyo heerka garaadka cunuga.
- Dadka soo sheegay waxa iyo
  - Xiriirka eedaysanaha la tuhunsan yahay.
  - Ogaanta warbixinta.
- Eedaysanaha la tuhunsan yahay:
  - Da'diisa.
  - Waxbixinada silica cunuga horey loogu geystay.
  - Dambiyo lagu soo eedeeyey ama lagu helay.
- Xaqiiqooyinka kale oo la caawin kara go'aansiga in cunuga la dar-xumeeyey iyo in kale.

## Shaqaalaha Adeegyada Bulshadu waxay u baahan karaan:

- Akhbaarta caafimaadka ee cunuga
- Baaritaanada caafimaad ee cunuga
- Akhbaarta uu bixiyey eedaysanaha la tuhunsan yahay
- Xaqiiqooyinka kale oo la caawin kara go'aansiga in cunuga la dar-xumeeyey iyo in kale.

Baaritaanada Qoyska waa khasab in la soo gaba-gabeeyaa 45 cisho gudahood kolka la aqbalo warbixinta.

### 2. La wadaag natiijooyinka dadka ku jira hawsha

10 cisho gudahooda ka dib kolka la soo gaba-gabeeyo Baaritaanka Qoyska, Shaqaalaha Adeegyada Bulshadu waxa ay u diraan warqad waalidka ama weliga cunuga taa oo u sheegaysa iyaga:

- In ilmo la dar-xumeeyey
- in qoysku u baahan yahay adeegyada ilaalinta cunuga iyo in kale
- Waxa ay aheeyaan sababaha go'aanadu
- In shaqaalaha adeegyada bulshadu ay u hogaansamaan sharciga kolka ay soo aruurinayaan akhbaarta
- Xaquuqda dadka ay u leeyihiin akhbaarta iyaga ku saabsan
- Xaquuqda ay dadku u leeyihiin inay waydiiyaan shaqaalaha adeegyada bulshadu inay dib-u tix-geliyaan go'aankooda.

Shaqaalaha adeegyada bulshadu waxa ay u diraan warqad eedaysaha la tuhunsan yahay taa oo u sheegta:

- In shaqaalaha adeegyada bulshadu ay go'aansadeen cunuga la dar-xumeeyey iyo in kale
- Sababaha go'aanka
- In shaqaalaha adeegyada bulshadu ay u hogaansamaan sharciga kolka ay soo aruurinayaan akhbaarta
- Xaquuqda dadka ay u leeyihiin qaar ka mid ah akhbaarta iyaga ku saabsan
- Xaquuqda dadka ay racfaanka uga qaadan karaan go'aanka.

### 3. Fidinta adeegyada

Baaritaanada Qoyska, shaqaalaha adeegyada bulshadu waxa ay go'aansadaan in adeegyada ilaalinta loo baahan yahay iyo in kale. Hadii la go'aamiyo in adeegyo loo baahan yahay. Hay'adadu waxa ay:

- Bixin adeegyo
- Waxa ay la shaqeyn qoyska si u sugaan amaanka qoyska ee mustaqbalka.

Hadii adeegyada ilaalinta ah aan loo baahnayn shaqaalahu:

- Waxa ay xiri kiiska
- Waxa ay u fidin qoyska akhbaar ku saabsan adeegyada kale ee caawin kara iyaga.

Shaqaalaha adeeegyada bulshadu waa khasab inay la wadaagaan natiijooyinka ka soo baxa baaritaanada dadka soo sheegay warbixinta tacadiga iyo dayaca ah, hadii sharcigu uu qabo in warbixin la sameeyo. Natiijooyinka lama wadaagi doono hadii aysan ahayn maslaxa cubuga in la wadaagaa.

ADA Advisory

Si aad macluumaadkan ugu hesho qaabab kale oo aad isticmaali karto iyo helitaanka loo simanyahay ee adeegyada aadanaha oo dheeri ah, qoraal u dir DHS.info@state.mn.us, wac 651-431-4670, ama iticmaal adeega lalinta ama isgaarsiinta wararka ee aad doorbideyso. ADA1 (2-18)